

HANNAANKA DIB-U-EEGISTA DASTUURKA SOOMAALIYA



Muxuu Dastuurku muhiim u yahay?

Maadaama uu yahay heshiis bulsho, Dastuurku wuxuu maamulaa nolosheenna - xuquuqahenna iyo xorriyadeheenna, iyo sidoo kale waajibaadkeena muwaadiniin ahaan.



Sidoo kale, Dastuurku wuxuu dhidibbada u aasayaa xeerarka iyo mabaadi'da hagaya nidaamka iyo shaqada Dowladda.

Soomaaliya ma leedahay Dastuur?

Laga soo billaabo 1960kii, Soomaaliya waxay yeelatay:



Kaddib tobaneeyo sano oo colaad ah, Dastuurka Federaalka Ku-meelgaarka ah ayaa la qaatay 2012-kii, taas oo waddada u xaareysa dib usoo kabsashada iyo xasilloonida dalka. Wuxuu Soomaaliya ku qeexayaa in ay tahay Jamhuuriyad federaal ah, madaxbanaan, dimoqraaddi ah, oo ku dhisan caddaalad bulshadeed. Wuxuu damaanad qaadayaa in dadka oo dhan ay xaq u leeyihiin matalaad ay ku yeeshaan nidaam dowladnimo oo loo wada dhanyahay.

Kala-soocidda awoodaha waxay hawlaha Dowladda u kala saareysaa saddex laamood: Sharci-dejin, fulin, iyo garsoor.

Maxaan ugu baahannahay inaan dib-u-eegis ku sameyno Dastuurka ku-meelgaarka ah?

Dastuurka Ku-meelgaarka ah waxaa ku socda dib-u-eegis, si uu u noqdo astaan wanaagsan oo ka tarjumeysa aqoonsiga iyo rabitaanka dadka Soomaaliyeed.

Dib-u-eegista Dastuurka Ku-meelgaarka ah waxaa ku xeeran dhowr waxyaabood oo muhiim ah, sida maqaamka magaalo-madaxda Soomaaliya, iyo kala-saarista awoodaha iyo dakhliga ee u dhaxeeya dowladda federaalka ah iyo dowlad goboleedyada xubnaha ka ah dowladda federaalka ah.

Meel-marinta Dastuur rasmi ah waxay kaalin muhiim ah ka qaadan doontaa xasilinta dalka federaalka ah.

Yaa qayb ka ah dib-u-eegista Dastuurka?

Dib-u-eegista Dastuurka ku-meelgaarka waa in ay noqotaa mid loo wada dhanyahay oo furan.

Si taas loo gaaro, Baarlamaanka Federaalka ah iyo baarlamaanka dowlad goboleedyada, Wasaaradda Arrimaha Dastuurka iyo dhiggeeda heer dowlad goboleed, iyo hay'adaha kale ayaa si wadajir ah uga wada shaqeynaya iyagoo wadatashi la sameynaya bulshada Soomaaliyeed.

Sideen ku heli karnaa Dastuur rasmi ah?

01

Guddiga madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgalinta Dastuurka ayaa diyaarinaya qabya-qoraalka wax-ka-bedelka Dastuurka Ku-meelgaarka ah, kaas oo ku salaysan wadatashi lala yeeshay qaybaha siyaasadda iyo dadweynaha.

02

Intaas kaddib, Guddiga Baarlamaan ee Isku-dhafka ah ee la socodka hirgalinta Dastuurka ayaa dib-u-eegis ku sameynaya qabya-qoraalka wax-ka-bedelka, wuxuuna u gudbinayaa Baarlamaanka Federaalka ah.

03

Intaas waxaa sii dheer, in Baarlamaanka Federaalka ah uu dood ka yeelanayo kadibna ansixinayo wax-ka-bedelka.

04

Ugu dambeyntii, dastuurka Soomaaliya ee la ansixiyay ayaa dadweynaha loo bandhigayaa si loo meelmariyo.

Sideen uga qayb noqon karaa geeddi-socodka?

Waxaad tegi kartaa kulamada dib-u-eegista dastuurka ee lagu qabto deegaankaaga, halkaas ayaadna ka sheegi kartaa aragtidaada.



Waxaad qoraal u diri kartaa hay'adaha u xilsaaran hawshan adigoo usii marsiinaya cinwaankan: info@moca.gov.so



<http://moca.gov.so>



@MoCAFGS



@MoCASomalia